



Isbedelo ku yimid barnaamijyada Pioneer iyo ACCESS

Iyada oo dadka intooda badani ay hada ka warqabaan, Guddiga Waxbarashadu waxay xaqiijisay go'aanka laba dugsiyo dhexe oo cusub oo dhammeystiran lagaga furayo Harriet Tubman iyo Roseway Heights, dayrta 2018-ka. Taasi awgeed, tiro ka mid ah dugsiyada laga kala imaanayo 'feeder schools' ayaa dib u habayn lagu samayn doonaa iyaga oo ahaa dhismayaasha K-8 hadana noqonaya K-5. Waxaa intaa dheer, u aqoonsiga Roseway Heights in loo isticmaalo dugsi dhexe ahaan uu macnaheedu yahay in Machadka ACCESS oo u baahan doono in la geeyo goob kale. Guddigu waxay Kormeeraha Guud u tilmaantay in uu aqoonsado hal goob oo cusub oo loogu talagalay 350 arday oo dhigata ACCESS. Hoggaamiyayaasha degmada ee sare oo ka kala socda waaxyaha, ay ka midka yihiin Dhismayaasha iyo Waxbarashada Gaarka ah, ayaa dhammaantood soo gebagabeeyay falanqeyn buuxda oo ku saabsan dhammaan dhismayaasha degmada si loo go'aamiyo goobaha laga yaabo in ardaydu si hooseysa isku qoraan ama si hooseysa loo isticmaalo.

Dhismaha Holladay Park-Youngson ayaa loo aqoonsaday in uu yahay midka ugu fiican ee la dooranayo ee hoy u noqon kara ACCESS. Dhismuhu wuxuu awood u leeyahay in ay isqoraan ugu yaraan 350 arday (isaga oo hore u ahaan jiray dugsi hoose), taas oo ay weheliso meelo kala duwan oo uu leeyahay sida goob jimicsi iyo barxad dugsiyo leeyahay, waxaana la go'aamiyay in uu yahay midka ugu haboon marka la eego dhammaan meelaha kale ee ay bannaan tahay in la kala doorto.

Tani waxay keentay hoggaamiyayaasha degmadu taasi darteed in ay si xiriir ah tixgelinta u siiyaan doorashada hal goob ama goobo badan oo hoy u noqon kara isla markaana si wanaagsan u taageeri kara tiro yar oo ah ardayda ka tirsan barnaamijka Pioneer. Hada, waxaa jira isugeyn dhan 123 arday (56 da'dii dugsiya hoose gaartay, 43 dugsiya dhexe ah, iyo 24 da'dii dugsiya sare gaartay) oo isqoray barnaamijka Pioneer, dhammaantood waxay ku yaalaan isla hal goob.

Hoggaamiyayaasha degmada waxaa ka go'an taageerada dhammaan ardayda PPS. Tani waxaa ka mid ah taageerida ardayda naafada ah oo ah in ay helaan meel aanay jirin wax xadidayaa. Waxaa sidoo kale jira balanqaad ah in bixinta taageerada ugu xoogan iyo waxqabadyada la heli karo si ardayda looga taageero baahiyaha ugu weyn ee ay qabaan. Wuxuu sidoo kale ahaa hadaf muddo dheer, oo lagu tilmaamay Qorshaha Istiraatiijiyada Waxbarashada Gaarka ah ee PPS, taasi oo ah in nidaamka dugsiya ujeedadiisu tahay in ay taageero joogto ah oo buuxda iyo waxqabadyada ugu suurtagalsan siiyaan dugsiyada ugu badan ee suurtagal ah. Tani waxay ardayda leh IEP u oggolaanaysaa in ay awoodaan helidda adeegyada ka jira dugsiyada xaafadooda iyada oo ay weheliyaan ardayda ay wada dhigtaan waxbarashada guud, sida ku habboon. Iyada oo hubaashii ay tahay ujeedo lagu dhiirigelinayo nidaam wax loo qabto oo loo wada dhan yahay oo ka jira dhammaan bulshadeena dugsiya, waxaa sidoo kale la aqoonsan yahay, in ardayda qaarkood, laga yaabo in ay u baahdaan waxbarasho qiimo leh dheeraad ah oo gaar ah oo iyada oo la eegayo baahiyahooda aadka ah. Ardayda laga yaabo in aanay awoodin in ay guul ka gaaraan meel dugsi sare ah oo dhammeystiran, PPS waxay had iyo jeer ka shaqaysay in ay wada shaqeyn la yeelato qoysaska si loo go'aamiyo haddii doorashada dugsi xaddidan oo daaweyn leh ay tahay mid ku habboon; tani waxaa ka mid ah fursadaha kala doorashada waxbarashada ah oo lala leeyahay Multnomah ESD. PPS ayaa sidoo kale daneynaya in ay sii wadaan ogaanshaha haddii barnaamij iyo goob (goobo) qiyaastooda yar tahay la abuuri karo kuwaasi oo u adeegi kara kooxo arday ah, iyada oo la eegayo heerka, kaasi oo laga abuurayo goobta (goobaha) ku yaala degmada halkaas oo sidoo kale laga bixin karo taageero xoog oo aan ahayn in ay ku taalo dhismayaasha dugsiya ee caadiga ah. Waxaanu daneynaynaa in aanu isku dayno sii wadida joogtaynta barnaamijka ugu ballaaran ee suurtagal ah iyada oo la eegayo xaddidaadaha ka jirta degmada.

56 arday ee Pioneer ee da'dii dugsiga hoose gaartay, waxaa dayrta 2018-ka dib loo dejin doonaa dhismaha Applegate iyaga oo hal koox ah. Goobtan dugsiga hoose muhiimada la siinayo waxay sii wadi doontaa in ay ka faa'iideysato heerarka shaqaalaha ee ay hada bixiso PPS sida lagu aqoonsaday IEP-ga ardayda. Saamiga ardayda/macallinku wuxuu sii ahaan doonaa 1.4:1. Dhismaha Applegate, waxaa loo habayn doonaa si muuqata si loo xaqiijiyo in fasallo ku habboon jiraan iyo meelo taageero oo ay ardaydu heli karaan. Maamulaha goobta loo qoondeeyey ayaa sii wadi doona in uu hoggaamiyo goobtan.

Ardayda heerka dugsiga sare waxaa adeegyada siin doona qayb ka mid ah macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo shaqaalaha taageerada iyaga oo ku bixinaya fasallo la qoondeeyay oo ku yaala dugsiiyo dhexe oo dhammeystiran oo kala duwan iyo dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall marka la gaaro dayrta 2018-ka. Waxay ahayd hadaf ay lahayd PPS in ay adeegyo joogto ah oo ballaaran iyo taageero siiso dhismayaasha dugsiga oo dhan. In la isku meeleeyo dugsii xafadda ku yaala waxay sidoo kale ardayga dhigata waxbarashada gaarka ah siiyaa fursadda, si sida ugu habboon, ay uga qayb qaataan barnaamijyada la ballaariyey iyo isku keenida fursadaha uu dhismaha dhammeystirani bixiyo. Ardayda dhigata dugsiga dhexe waxaa lagu dari doonaa fasallo gaar ah oo leh macallin, laba macallin-barayaal, la taliyaha daaweynta waxka qabashada, iyo daryeel bixiyaha caafimaadka dhimirka oo shaqo buuxda haya. Ardayda dugsiga sare waxay sidoo kale heli doonaan koorsooyin la bixinayo, iyaga oo heli doona fursad ay isku dhexgalaan ardayda ay wada dhigtaan waxbarashada guud. Maamulayaasha dugsiga dhexe iyo sare waxaa ka go'an in ay u diyaar garoobaan isla markaana si wanaagsan u qaabilaan ardayda Pioneer. Waa wax la fahamsan yahay in tababarka iyo horumarinta xirfadeed loo baahan doono in la bixiyo si loo taageero dhammaan bulshada dugsiga si hab wanaagsan loogu fahmo baahiyaha gaarka ah ee ardayda Pioneer.

Kormeeraha Guud ee Guerrero, marka dhinac la iska dhigo waayo-aragnimada uu u leeyahay hoggaaminta bixinta hababka adeega waxbarasho ee gaarka ah, wuxuu ku tiirsanaa khibrada iyo talooyinka hoggaamiyeyaal badan oo ka tirsan degmada. Agaasimaha Sare ee Adeegyada Ardayga Mary Pearson, Agaasimaha Robert Cantrell, iyo Maamulaha Pioneer Mike LaFramboise dhammaantood waxay bixiyeen talooyin iyo fikir kooda ugu fiican. Dhammaantood waa kuwo aad u yaqaan taariikhda iyo marxaladaha uu soo maray barnaamijka Pioneer. Qorshahani wuxuu awood u leeyahay in uu noqdo jawiga waxbird iyo waxbarasho oo aad u wanaagsan iyo in uu wanaajiyo waayo-aragnimo waxbarasho iyo ardayda ay taariikh ahaan natiijooyinkooda tacliimeed hooseyso. Shaqaale ka socda Xarumaha PPS ayaa sidoo kale sii wadi doonaa in noqdaan kuwo ay wada shaqeyni ka dhaxayso si loo qiimeeyo isla markaana loo bixiyo jawiga ugu wanaagsan ee suurtagalka ah oo loogu talagalay ardayda.

Hoggaamiyayaasha PPS waxay bilaabeen in ay la kulmaan dhammaan maamulayaasha, kulliyadaha uu isbeddelkani khuseeyo, waxayna sidoo kale qorsheeyeen waqti ay kula kulmaan qoysaska Pioneer si ay u siiyaan macluumaad toos ah uguna sharaxaan qorshaha wada xiriirka iyo fursadaha loogu talagalay qoysaska si ay u haysan karaan macluumaadkii u dambeeyay isla markaana u dhiibtaan fikrad iyo jawaab celin inta u dhaxaysa hada iyo dayrta. Hoggaamiyayaasha PPS waxaa isla hadaba ka go'an in ay la kulmaan kooxaha waalidiinta waxbarashada gaarka ah si looga wada hadlo dadaaladeeda ay wado ee sida wanaagsan loogu adeegayo ardayda naafada ah ee ka tirsan nidaamka dugsiga. Macluumaadka cusub waxaa la soo gelin doonaa isla markaana laga heli doonaa bogga internet-ka rasmiga ah ee degmada ee hore u socoshada.